

Waa maxay Qorshe-shaqsiyedka ee iskudabaridan?

Qorshe-shaqsiyedka ee iskudabaridan waa wax wanaagsan, haddii taageero aad ka hesho goobo badan oo kala duwan, tusaale xarumaha daryeelka caafimaadka/bukaanka ama dhaqdha-qaaqa baxnaaniska oo aad ka hesho gole-goboleedka, kaalmo-dhaqaa-leedka, daryeel-caafimaadeedka guriga lagugu siiyo, taageerada ay Dowladda hoose guriga kugu siiso. Qorshe-shaqsiyedka ee iskudabaridan wuxuu ku fududaynaya saamayn ku yeelanshada

caawinaadda aad u baahan tahay oona aad xaqa ku leedahay. Tan kale, wuxuu ku tilmaamaya sida hawlahay iyo mas'uuliyadda loo qaybsaday.

Qoddobada qorsheha ay ka koobnaan doonaan adiga ayaa go'aankooda iska-leh. Tusaale ahaan, qor hadafka iyo baahida u qabto daawaynta, waxyaalaha caawimaad ahaan lagu isticmaalo iyo taageerid

2. Markii aad wada kulmaysaan qof kasta wuxuu kaalin ka geysan doona qorida Qorshe-shaqsiyedka iskudabaridan ee adiga ku gaarka ah. Waaad ka wada xaajon doontaan waxa aad doonayso iyo waxa aad u baahan tahay.
3. Markii muddo ka soo wareegato shirkii ugu horeeyay, haddana mar labaad ayay kooxda kulan yeelan doonaan. Markaas waxaad ka sheekayn doonta sidii ay ahayd taageeradii lagu qorsheeyay, iyo haddii aad weli isla hadafkii aad leedahay. Haddii u jiro qodob u baahan in wax laga beddelo waad sheego karta. Haddiise wax kasta u hahaagsan yahay, waad iska wadan doonta qorshehaaga.
4. Haddii goor dambe u dareenkaaga yahay, in aadan Qorshe-shaqsiyedka ee iskudabaridan u baahnayn, waad wargelin karta. Xaaladaas adiga iyo xirriiyeyaashaada waxaad soo gabagabayn doontaa hawlilii qorsheha.

Maxaan sameeya haddii aan doonaayo in lay dejiyo

Qorshe-shaqsiyedka ee iskudabaridan

Qof kamid ah dadyoowga gole-goboleedka ama Dowladda hoose ee aad xiriirkal la leedahay, aaya badi ahaan soo jeediya in lagu sameeyeyo Qorshe-shaqsiyedka ee iskudabaridan. Ama adiga ayaa codsan karo. Haddii aadan doonayn laguguma qasbaayo. Xitaa haddii aad diido qorsheha

noocaas, waxaa lagu siin doona daryeel-caafimaadeedka iyo aad u baahan tahay.

Qofka noqon doono iskudabaridha qorshehaaga adiga ayaa dooran karo. Tusaale ahaan wuxuu noqon kara qofka xiriiriyeahaaga ah.

Maxaa kaddib dhici doono

1. Kaddib markii aad go'aansato inaad doonayso in Qorshe-shaqsiyedka iskudabaridan, waxaad kala xulanaysa dadyoowga aad doonayso in ay qorsheha ku dejiyaan. Waaad kaddib shir kula kulmi doonta dadyoowgaas. Waxaa wanaagsan in dhammaan dhaqdhaqaqyada taageerada laga siiyo ay dadyoowgaas kamid yihiin, laakinse haddii aad doonayn qaarkood waad ka reebi karta xulashada. Waaad kaloo shirkal ku cusuumi karta qaraabada, wakiilkaaga, Khasnadda caymiska bulshada, Xafiiska Shaqada iyo dugsiga. Waxaa muhim ah in dhammaantood ay shir ka qaybgelida isku soo diyaariyaan.

Qorshe-shaqsiyedka ee iskudabaridan waxaad adiga iyo dhaqdhaqaqa qori kartaan

- Baahida aad maanta leedahay
- Noocyada waxkaqabadyada ka kooban taageero iyo caawinaadda aad heli karto, ujeedada waxkaqabdyada iyo goorta la soo gabagabayn karo
- Waaxa dhaqdhaqaqyada ay sameeyn karaan sidii lagu siiyo taageerada iyo caawinaadda kugu habboon
- Qofka mas'uulka ugu wayn ka ah Qorshe-shaqsiyedka ee iskudabaridan iyo sida ma'uuliyadda loo kala qaybsaday
- Sida adiga iyo dhaqdhaqaqa u tixraaci doonaan, una qiimayn doonaan taageerada lagu siiyo, iyo inta jeer taasi lagu dhaqaaqi karo
- Goorta wadashaqaynta la soo gabagabayn doono

Qorshe-shaqsiyeedka ee iskudabaridan

Haddii taageero iyo taaageero ka hesho dhaqda qaaqaqa kala duwan, Dowladda hoose iyo gole-goboleedka waxaad badi ahaan xaq ku leedahay in lagu siiyo Qorshe-midaysan waxa Maamulka adeegga bulshada iyo daryeelka caafimaadka/bukaanka ka caawini karaan.

Warbixin dheeraad ku saabsan Qorshe-shaqsiyeedka ee iskudabaridan iyo xuquuqda aad leedahay waxaad ka aqrisan karta shabakadda internetka:

[http://www.1177.se/Vastmanland/Regler-och-rattigheter/
Samordnad-individuell-plan-SIP2/](http://www.1177.se/Vastmanland/Regler-och-rattigheter/Samordnad-individuell-plan-SIP2/)



ARBOGA KOMMUN



HALLSTAHAMMARS
KOMMUN



Surahammars
kommun



KÖPINGS
KOMMUN



NORBERGS
Norbergs Kommun



Fagersta
KOMMUN



Kungsör



SALA
KOMMUN



VÄSTERÅS STAD

Qorshe-shaqsi- yeedka ee iskudabaridan (SIP)

Loogu talagalay qofka adigoo kale ah oo ku nool Gobolka Västmanland, oo u baahan in laga caawinno iskudabaridida xiriirka Maamulka adeegga bulshada iyo xarumaha daryeel-caafimaadeedka.

Somaliska

*Region Västmanland tillsammans med
kommunerna i Västmanlands län*

